

Somali

Qorshaha Tasiilaadka Sannadaha Hore ee Golaha Degaanka Darebin 2021-2024: oo Hal mar la eegayo

Golaha degaanku wuxuu sameynayaa qorshe wakhti dheer ah si ay u hubiyaan in Darebin ay leedahay goobaha iyo dhismayaasha ay u baahan tahay si ay u bixiso isticmaalka loo siman yahay ee adeegyada lagama maarmaanka u ah carruurta yar yar iyo qoysaskooda ayna u baahan yihin si ay u guuleystaan. Wuxaan hadda ka dooneynaa talagelyo bulshada iyo adeeg bixiyayaasha sannadaha hore Qorshaha Tasiilaadka Sannadaha Hore ee qabyo qoraalka ah.

Qorshuhu wuxuu xoogga saarayaa tasiilaadka ay u baahan tahay Darebin si ay u bixiso adeegyada muhiimka ah iyo barnaamijyada carruurta jira 0-6 iyo qoysaskooda oo ay ku jiraan adeegyada caafimaadka ilmaha iyo Hooyada, kindhada, xannaano maalmeedka dheer, xannaanada wakhti wakhtiga ah, maktabadaha alaabta lagu ciyaaro iyo kooxa carruureedka ciyaaraa.

Xeerarka hogaaminta – qorshaha waxaa ku jira xeerarka soo socda si ay u hogaamiyaan go'aan qaadashada:

Sinnaan: oo awood u siinaya dhammaan carruurta iyo qoysasku inay guuleystaan

- **Isticmaalka** – tasiilaadka ay heli karaan dhammaan qoysaska iyo carruutu
- **Kala duwanaanta iyo ku soo darida**- tasiilaadka soo dhaweynta leh ee dhammaan isku Daraya dadka.
- **Doorasho-** u ogolaanshaha qoysasku inay doortaan adeegyada sida ugu fiican ugu haboon iyaga
- **Tayada-** tasiilaadka tayadoodu sareyso ee loogu talagalay adeegyada tayadoodu sareyso
- **Isugeynta** – taageerida iskaashiga iyo bixinta adeega iskujira
- **Dhammaan bulshadu siday u wajaheyso**- faa'iidana siinaya dhammaan bulshada
- **Hawlgelinta bulshada**- oo ay hageyso aragtida bulshada
- **Waardid dhowrida degaanka**- tasiilaadka adkeysiga leh ee la dhowri karo
- **Isticmaalida degaanada dabiiciga ah**- oo awood u siinaya carruurtu inay ku ciyaraan waxna ku bartaan dabecada
- **Fanka iyo dhaqanka hal abuurka leh** – ku xirida carruurta fanka iyo dhaqanka
- **Horumarinta dhaqaalaha**- siinta bulshada, dhaqaale iyo qiimaha degaanneed ee maalgelinteenaa

Soo koobida waxa la qabanayo – qorshaha waxaa ku jira waxqabadkaan muhiimka ah ee soo socda:

- Hubinta in loo isticmaalo tasiilaadka sannadaha hore ee jira heerka ugu sareeya si loo bixiyo adeegyo badan iyo isticmaalka bulshada.
- Ka hadlida arimaha shaqadooda tasiilaadka sannadaha hore ee jira ee Golaha.
- Balaarinta tasiilaadka sannadaha hore ee jira si loo bixiyo mug dheeraad ah meeshii loo baahdo.
- Ujeedoodada dhismayaasha kale ee Golaha degaanka waxa loo isticmaali dib ugu habeynta bixinta adeega sannadaha hore meeshii macquul ah.
- Qorsheynta in la dhiso tasiilaad Gole degaan oo cusub meelaha baahidoodu sareyso, oo ay ku jiraan xarumaha sannadaha Hore iyo Xarumaha Jiilasha isku dhex jira.
- Raadinta u doodis iyo istiraatijiyadaha shirkanimada si loo bixiyo maalgelin tasiilaadka sannadaha hore oo ka imaneysa ilaha gaarka ah iyo kuwa dawlada oo kala duwan.
- Iskudar goobaha Caafimaadka Ilmaha iyo hooyada (MCH) si dhammaan adeegyada MCH ay ugu yaaliin tasiilaad laba qol ah oo lagu daray adeegyo kale.
- Dib u eeg baahida xannaanada wakhti wakhtiga ah iyo garashada fursadaha ah in la kordhiyo haddii loo baahdo.
- Dib u eeg baahida goobaha kooxda ciyarta oo garo fursadaha lagu kordhinayo haddii loo baahdo.
- Ka hadlida baahida tasiilaadka dhismo ee la ogaaday ee dib u eegista Maktabada Alaabta carruurtu ku ciyarto.



Fadlan sii tallo ka bixinta xeerarka iyo waxqabadyka ku jira Qorshaha qabyo qoraalka ah adoo buuxinaya xog raadinta online ka ah. www.yoursaydarebin.com.au/eyip. Bixi tallo bixintaada 14 Nofeembar 2021.

Si aad u ogaatid wax badan oo ku saabsan fursada tallo ka bixinta natijada Golaha iyo kula hadlida qof luuqadaada, fadlan wac 8470 8470.